Gubashada ayaa ah waxa ugu xanuunka badan iyado dhaawacyo fool-xuma lehna ku reeba qofka ka badbaaba. In ilbriqsiyo ah, ayay gubashadu sababi kartaa dhaawacyo jirka iyo kuwa qiirada oo qofka ku daba dheeraada, gaarahaan caruurta. Caruurtu maqaarkoodu waa ka khafiifsanyahay kan dadka waaweyn; wuxu ku gubaya darajo xararad hoose, dhaawacuna hoos ayay sii aadayaa. Caruurta yar-yar si fudud ayay ku gubtaan sababtoo ah muddo yar kuma ogaan karaan khatarta sida dadka waaweyn. Waxa dhici karta inaysan ogayn aqoonna u lahayn waxa hareereya iyo halista ku soo fool leh. Ugu dambayntii, ay u dhintaan cadaadis jirka ee ka soo gaara dhaawaca gubasha.

Sanad kasta 600 caruura ayaa ku dhinta iyado 100,000 kale laga daaweeyo dhaawacyo la xariira gubasho. Minnesota dhexdeeda, sanad kasta qololka gargaarka deg-degga waxa lagu eegaa dhaawacyo la xariira gubashada cel-celisahaan ka badan 5,000 eegmo sanadkiiba.

Badankeen ammaanka ugu badan ayaan guriga ku haysanna, laakiin jikadaada iyo suuliga waxay noqon karaan meelaha ugu badan ee lagu dhinto ee gurigaada. Adiga ayay kuu taallaa sidii aad u nabadgeli lahayd naftaada iyo dadka kaleba.

*Waaxda Caafimaadka Minnesota

MINNEAPOLIS EMT FIRE RESCUE

www.ci.minneapolis.mn.us/fire

Xiriir la leh

MINNESOTA PUBLIC SAFETY STATE FIRE MARSHAL

www.fire.state.mn.us

Ka hortagga Gubashada

Walaacyada gubashada

MAXAN SAMAYN KARAA?



Ogsoonow halista hareerahaada taalla iskana yaree. Samee si masuuliyadnimo, tusaalaha badbaada dadka kale.

Ka taxadddaridaha Jikada

- Jikada ku sugnow marka aad wax karinaysid.
- Meel dhig waxyaabaha gubanaya, oo ay ku jiraan gacmo-gashida iyo shukummaannada, ka fogee meelaha cunta karinta.
- Gasho dhar kula eg ama labis gacmaha qarinaya markaaad cunto karinaysid, ama isticmaal wax jilicsan oo dib-u celinaya waxa raaraca ama gacma-gashiga dheer.
- Isticmaal dabka dambe ee cuntada lagu kariyo gacanta digsigana gudaha u jeedi. Cunug falaadaya ayaan dafi kara caaradda gacanka digsiga gedina kara.
- Xarigga korontada ku xir qalabka guriga meel ka fog darafka miiska si cunugga looga ilaaliyo in uu dugsuuda soo jiito.
- U isticmaal sharaabka kulul ee daadanaya weel dhegleh oo adag.
- Marka socod-baradku meesha joogo, ka qaad marada miiska si caruurtu aanay u soo jiidan una daadin waxa kulul ama shay culus.
- Caruurta u samee “meel ama goob ammaan ah” ee makiinadda cuntada agteeda ama foornada---qiyaasti in u jirta 5 cag. Caruurtu waa inay bannaanka ka joogaan masaafadaaas.
- Bar caruurta in saxanka cunto-kululeeyuhu inuu qaboow noqon karto, laakiin ay cuntadu kululaynkarto.

Ka taxaddaridaha Kale

- Tijaabi biyaha qasabadda inta aadan cunuggaada waaskada dhigin. Ku habee biyaha herkulka 120 Fahrenheit ama ka hoosaysa iyo markasta ilaalin kartid.
- Ku hay kabridyadaha, sigaar-shidaha, iyo dareeraha holca meel aanay caruurtu gaarin.
- Marna gaaska ha isticmaalin agaagaarka ilo holac dhalin kara, isticmaal meel haw furan leh, marna ha u isticmaalin dhuxusha. Buuxi barmiilka caws iyo geedo-jaraha inta aadan bilaabin isticmaalkiisa. Haddii aad doontid in aad shidaal ku shubto inta aadan dhammayn hawsha, hubi in motoorka qaboobo.
- Digniin-bixiyaha qaaca waa in lagu rakibo dabaq kasta iyo meelkasta ee guriga oo ka mid ah meelaha la seexdo. Tijaabi bishiibo mar kana baddal bateriga sanadkiiba laba jeer.
- Samee qorsha tijaaab laba irdood oo dabka looga baxasanayo qol kasta.

Waan gubtay, hadda maxaan samayn karaa?

Jooji hawlaha gubashada

Ka qaad dharka, dahabka iyo macdanta agaagaarka meelaha gubanaya; waxay celinayaan kulaylka waxayna ku kordhiyaan maqaarka waxyeellada. Haddii walxuhu ay xannibayaan maqaarka weydiiso biyo diiran raadsana daaweyn. Ku shub biyo diiran oo aan qaboobayn meesha gubanaysa dhowr daqiiqo.

Baraf ha adeegsan meesha gubatay waxaa laga yaaba in uu uga daro.

Kareem ha adeegsan ama xayrta bomaatada.

Ha burburin nabarrada biyuhu galeen inta dhakhtarku ka arkayo.

Gubashooyinka hore (guduudka) iyo darajada labaad (biyaha oo ku xirma) ee ka yar qofka calaacashiisa gurigiisa isaga daaweyn karo. Ka hortag caabuqa adigo si dabacsan dhowr jeer biyo ku mayraya maantiiba antibiotic fudud iyo saabuun. Biyo raaci gabi ahaan. Ku dabool meelaha furan harqad nadiifa. La tasho dhaqtarka qoyskaada ama xarumaha gubashada deegaankaada haddii gubashado aanay ku raysan saddex maalmood ama ay muuqdaan astaamo caabuq.

Gubashooyinka baahsan (ka weyn wax gacanta lagu daaweeyo), kiimikada ama gubashooyinka korontadas. Oo wajiga saamaysay, neefsiga, gacmaha, lugaha ama xubnaha dhalmada wac 911 ama lambarka gurmadka deg-degga ee deegaankaada.